

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA  
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA  
ARRIMAHA SHARCIGA EE TAYO  
MUQDISHO - SOOMAALIYA



جمهورية الصومال الفدرالية  
مكتب تيو لتوثيق العقود  
والإستشارات الشرعية  
مقديشوا - الصومال

SHARCIGA DHISMAHA NOOTAYO

(MOGADISHU PUBLIC NOTARY)



MOGADISHU-SOOMAALIYA

2024



+252 612-223788  
+252 615-353330

info@tayonotary.com  
www.tayonotary.com

Bakara Market, Near Maalin Tajir  
Building, Mogadishu - Somalia



## **UJEEDO:- DHISID SHARCIGA MOGADISHU PUBLIC NOTARY**

**Maanta** oo ay taariikhdu tahay **07/11/2023**, Anigoo ah **Dr, Maxamed C/llaahi Maxamed "Maxamed Nootaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed Ee Daarta Maalin Taajir Ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid Mudanahaan hoos ku Xusan:-

1- **Dr. SICIID CALI COSOBLE**" Somali ah, Degan Muqdisho, Lehna Somali Passport No.P01286753 Ahna Malkiilaha Mogadishu Public Notary.

Mudanaha kor ku xusan asaga oo caafimaad qaba, caqligiisuna taam yahay, cid heshiiskan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxuu i weeydistay in aan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharci Nootaayo oo ka kooban qodobada hoos ku qoran:-

### **QODOBKA 1-AAD**

#### **MAGACA IYO ASTAANTA NOOTAAYADA MOGADISHU PUBLIC NOTARY**



### **QODOBKA 2-AAD XARUNTA NOOTAAYADA**

Xarunta Mogadishu Public Notary, Waa Degmada Howl-Wadaag Ee Magaalada Muqdisho Ee Caasimadda Soomaaliya.

### **QODOBKA 3-AAD WAQTIGA LA ASAASAY**

Mogadishu Public Notary Waxaa La Asaasay Sanadkii 1991 Waxaa Lagu Asaasay Magaalada Muqdisho Ee Caasimada Soomaaliya.

### **QODOBKA 4-AAD NOOCA NOOTAAYADA.**

Nootaayadani waa Nootaayo uu lee yahay shaqsiyaa (Sole Proprietorship) haddaba dhamaan hatida Nootaayada waxaa ka kooban Malkiilaha Nootaayada.



+252 612-223788  
+252 615-353330

info@tayonotary.com  
www.tayonotary.com



Bankara Market, Near Maalin Tajir  
Building, Mogadishu - Somalia



**QODOBKA 5-AAD**  
**UJEEBADA NOOTAAYADA**

- Kala Wareejinta dhulka
- Kala Wareejinta Guryaha iyo Dabaqyada.
- Kala Wareejinta Goofafka.
- Kala Wareejinta Baburta & Bajajyada
- Qorista Heshiisyada & Qorista Arjiyada.
- Qorista Wakaaladaha Guud & Kuwa Gaarka ah
- Qorista Cadeymaha
- Latalinta Arimaha Sharciga & Dhaxalka.

**QODOBKA 6-AAD**  
**MALKIILAHA NOOTAAYADA**

Malkiilaha Nootaayada Waa Dr. SICIID CALI COSOBLE Waxuuna Awood Buuxda U Leeyahay Maamulka Guud Ee Nootaayada iyo kutasarufka hantida, Sida In Uu Lacag Ku Shubi Karo Kana Saari Karo Bangiyada Dalka Iyo Dibadaba, Saxiixi Karo Jeegaga iyo Rahana Gelin Karo Hantida Nootaayada, Kana Saari Karo Una Soo Gadi Karo Una Soo Iibin Karo Nootaayada Hantida Maguurtada Iyo Guurtada Sida Dhulalka, Guryaha , Baaburta Iwm , Lana Geli Karo Heshiisyo Iyo Macaamilaad Shirkado Kale Iyo Hayadaha Dowliga Ah Iyo Kuwa Aan Dowliga Aheynta Oo Ay Dani Ugu Jirto Nootaayada .

**QODOBKA 7-AAD**  
**TIRADA DADKA AA'SAASHA NOOTAYADA**

Nootaayada waxaa aa'saasay halka qof ee sare ku xusan.

**QODOBKA 8-AAD**  
**HADUU MILKILUHU GEERIYOOTA**

Hadii Uu Milkiilaha Geeriyoodo Waxaa Xaqiisa Yeelanaya Dhaxaltooyadiisa Sharciga Ah, Oo Ay Soo Caddeyso Maxkamad, Kadib Waxay Soo Magacaabanayaan Wakiilo.

**QODOBKA 9-AAD**  
**XISAABTA NOOTAAYADA**

Xisaab xirka Nootaayada :- xisaabta Nootaayada waxaa la xirayaa Bilkasta Dhamaadkeeda



+252 612-223788  
+252 615-353330

info@tayonotary.com  
www.tayonotary.com



Bakara Market, Near Maalin Tajir  
Building, Mogadishu - Somalia



**QODOBKA 10-AAD**  
**GUDOOMINTA SHIRARKA NOOTAAYADA**

Shirarka kala duwan ee Nootaayada, waxaa shir gudoominaya Milkiilaha Nootaayda, haddii uu maqan yahay Malkiilaha, waxaa shirarka gudoominaya ku xigeenkiisa ama madaxa xisaabedka Nootaayada iyo cidii kale oo si qoraal ah ugu wakiisho Malkiilaha marka lawaayo ku xigeenkiisa iyo madaxa xisaabedka Nootaayada.

**QODOBKA 11-AAD**

**WAXYAABAHA AAN LAGU XUSIN XEERKAN**

- Dhammaan waxaa aan lagu sheegin xeerkan waxaa loola noqonaya sharciga islaamka qeybta mucaamalaadka iyo Nootaayadaha, sidoo kale qawaaniinta dalka u degsan.
- F.g wixii shareecada islaamka ka hor imaanaya waa waxba kama jiraan.

**QODOBKA 12-AAD**

**ISTICMAALIDDA MAGACA NOOTAAYADA**

- Magaca Nootaayada ayaa loo isticmaalayaa dhammaan hantida shirkadda sida: guryaha, dhulalka, gaadiidka, bank account, heshiisyadda, tiimbarayaasha iwm.

**QODOBKA 13**

**HESHIISKAN WUXUU KA KOOBAN YAHAY**

**13 QODOB 1 COVER , 4 BOG IYO 2 NUQUL OO ORJINAAL IYO KOOBI AH.**

SAXIIXA MILKIILAHA

Dr. SICIID CALI COSOBLE"

**( XAFIISKA NOOTAAYAHA )**

REP. 1249/T.P.N/24, Tr.07/11/2024, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixa Kor Ku Xusan uu yahay Saxiixii Runta ahaa waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Nootaayada ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, islamarkaana uu saxiixay milkiilaha Nootaayada Nootaayaduna waxey hubisay magaca inuu yahay kii dhabta ahaa ee lahaa saxiixaan kor ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.



**NOOTAAYAHA**

**Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**



+252 612-223788  
+252 615-353330



info@tayonotary.com  
www.tayonotary.com



Bakara Market, Near Maalin Tajir  
Building, Mogadishu - Somalia





## FOOMKA BIXINTA SHARCI DHISMO NOOTAAYO

REP.1249/TPN/2024

Tr, 07/10/2024

Magaca qaadaha: →  
Meeshuu deganyahay →

Dr. Saen I Law Coso, 1/1

H. Osman

Telfoonkiisa: →

0615572999

F. G. W. Osman USN 3/2/2024  
M. P. N.

SAXIIXA BIXIYAHA:

SAXIIXA QAADAHA: